

## WA Dept. of Financial Institutions Caawimada Maaliyadeed ee Macmiilka & Macluumaadka COVID-19

### U Badbaadi Naftaada Dhaqaale Ahaan

<https://www.consumerfinance.gov/about-us/blog/protect-yourself-financially-from-impact-of-coronavirus/>

### Caawimada Amaahda Guryaha ee Dadka Degan Washington

- Hadii aanad bixin karin lacagta daynta gurigaaga (amaahda guryaha), ama aad bixin kartid kaliya qeyb yar, ula xidhiidh dayn bixiyahaaga si degdeg ah.
- **Latelinta iyo caawimada Lahaansha Guryuhu waa u diyaar dadka degan Washington**, iyadoon loo eegayn cida leh ama bixisa adeega. Dadka guryaha leh waxay wici karaan DFI's lambarka bilaashka ah **1-877-RING-DFI (746-4334)** si ay u helaan caawimada iyagoo la xiriiraya bixiyaha daynta, oo ay waxbadan uga ogaadaan khiyaarada. Si aad ula shaqeysid lataliye guri, ka wac khadka Xaqlayaasha Guryaha Washington **1.877.894.HOME (4663)**. Adeegyada turjumaadu waa u diyaar labadan lambarba.

**Xeerka Caawimada Karoonfayras, Samafalka, iyo Taageerada Dhaqaale (CARES)** wuxuu u diyaariyaa labo difaac xaqlayaasha guryaha ee ku jira caawimada daynta fadaraalka:

1. Cida ku amaahisay ama dayn bixiyahaagu kaalama noqon karaan ilaa iyo Diseembar 31, 2020 - booqo [www.hud.gov](http://www.hud.gov) wixii warar ah. Gaar ahaan, Xeerka CARES wuxuu mabnuucayaa in amaahiyayaasha iyo adeeg bixiyayaasha laga bilaabo xukunka kaala noqoshada kaa dhan, ama dhameystirka kala noqoshada ama iibka, inta lagu jiro wakhtigan. (**Kala noqoshadu waa nidaamka sharci kaasoo dayn bixiyuhu ku qaato hanti, guriga kaga saaro guriga cida leh ama ku iibiyo guriga ka dib marka xaqlaha gurigu aanu awoodin inuu sameeyo lacag bixin dhameystiran.**)
2. Hadii aad waajahdid caqabad dhaqaale oo ay ugu wacan tahay xanuunka karoonfayras, waxaad xaq u leedahay inaad codsatid in lagu dulqaato 180 cisho. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsatid mudo kordhin hal mar ah ilaa 180 cisho ah. Waa inaad la xiriirtaa dayn bixiyahaaga si aad u codsatid dulqaadkan. Ma jiri doonaan wax lacago oo dheeriya, ganaaxyo ama ribo dheeraad ah (ka baxsan inta la qoondeeyey) oo lagu darayo akoonkaaga. **Dulqaadku** waa marka dayn guri bixiyahaaga, shirkada soo dirta bayaanka dayntaada ee maamusha dayntaada, ama dayn bixiyuhu ogalaado inuu joojiyo ama yareeyo lacag bixinta mudo kooban. Dulqaadku ma maabi'inayo waxa lagugu leeyahay. Waa inaad bixisaa wixii lagaa daayey ama lagaa yareeyey mustaqbalka.

### Been-abuurka

**Been-abuurka Maalgashi ee COVID-19:** Ka hor intaanay sameyn go'aamo waaweyn oo maalgashi, maalgashadayaashu waa in ay sameeyaan baaris oo ay xaqiijiyaan in ay la shaqeynayaan khubaro maaliyadeed oo liisan haysta. Wac 877-RING-DFI (746-4334) wixii caawimo ah.

### Talooyinka Iska Ilaalinta Been-abuurka

- Wakaaladaha dawladu kuma soo wici doonaa ama qoraal kuuma soo diri doonaa khuseeya kabka ama lacagta, kuma weydiin doonaan lacag dhigasho, lacag adeeg ama lacag bixin kale si aad u heshid kabkaaga.
- Wakaaladaha dawladu kuma weydiin doonaa lambarka Adeega Bulshada, lambarka akoonka bangigaga, ama labarka credit card kaaga.
- Iska jir iimaylada, wicitaanada, iyo qoraalada ka imanay cid aanad garaneyn.



**WA Dept. of Financial Institutions  
Caawimada Maaliyadeed ee Macmiilka & Macluumaadka  
COVID-19**

**Karoonafayras: Macluumaadka Daynta Ardeyda iyo Amaahdayaasha**

Wixii caawimo dayn ardey ah, la xiriiir **U-doodaha Amaahda Ardayga Washington**

Washington Student Achievement Council kala xiriiir [loanadvocate@wsac.wa.gov](mailto:loanadvocate@wsac.wa.gov) ama wac DFI wa 877-746-4334 si aad ula hadashid xubin ka tirsan kooxda dayn bixinta.